

Waxbarashada ardayda waddanka u soo guurtey ee magaalada Oulu

Ardayda asalkoodu yahay dadka waddanka u soo guurey waxay iskuul dhigashada inta badan ka bilaabaan waxbarasho ah u diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarashada ah u diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah waxaa loogu talagalay arday walba oo ay waajib ku tahay waxbarashadu, laakiin af Finnishka uu yaqaanaa aanu weli ku filnayn inuu waxbarashada la qaato fasallada waxbarashada caadiga ah.

Gudoonka waxbarashada ee magaalada Oulu wuxuu waxbarashada diyaarinta ah ka qabanqaabiyaa iskuullada la isugu geeyey waxbarashada dadka waddanka u soo guurey, ardayda dhigataana waxay ka kala yimaadaan xaafadaha kala duduwan ee Oulu. Kooxaha waxbarashada diyaarinta ah ee dugsiyada hoose waxaa lagu dhigtaa iskuullada Kaakkuri, Kaukovainio, Koskela, Myllyoja iyo Paulaharju. Kooxaha dugsiyada dhexena waxay waxbarashada diyaarinta ah ku qaataan iskuullada Kastelli, Merikoski, Rajakylä iyo Terva-Toppila.

Caadi ahaan waxbarashada diyaarinta ah waxay qaadataa hal sannad-dugsiyeed, laakiin ka badan xitaa way qaadan kartaa oo waxay ku xiran tahay siduu ardayga hore ugu socdo. Waxbarashada diyaarinta ah waxbariddu waa mid qof walba siduu wax u baran karo, wax loo baro, waxaana la fuliyaa iyadoo waafaqsan qorshaha waxbarashada shakhsi ahaaneed ee ardayga. Ardayda marka wax la barayo waxaa la tixgeliyaa afafka iyo dhaqamada kala duwan ee ardaydu ka soo jeedaan, ardayga da'diisa iyo heerka horumarkiisa, taariikhda hore ee waxbarasho iyo siduu ugu diyaarsan yahay waxbarashada.

Waxbarashada ah u diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah waxay ardayga u diyaarinaysaa siduu ugu wareegi lahaa waxbarashada kooxaha waxbarashada caadiga ah. Waxbarashada diyaarinta ah waxyaabaha ugu muhiimsan waa barashada afka Finnishka iyo erayada loo isticimaalo maadooyinka kala duduwan. Waxbarashada maadooyinka kala duduwan waxaa qaybta kaga haboon la raaca waxyaabaha salka u ah qorshaha waxbarashada ee waxbarashada aasaasiga ah.

Ardayda dhigata waxbarashada diyaarinta ah si ay tartiib tartiib ula qabsadaan waxbarashada caadiga ah, waxaa waxbarashadu markay bilowga tahay la bilaabaa inuu ardaygu maadooyinka xirfadda iyo farshaxanka ah la qaato fasallada waxbarashada caadiga ah. Ka dibna sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah ayaa loo bilaabaa inuu ardaygu fasallada caadiga ah la qaato maadooyinka kale ee uu aqoontooda aasaasiga ah hore u lahaa, sida usaale ahaan afafka ajnebiga ah ama xisaabta.

Waxbarashada diyaarinta ah ka dib ardayda waxaa loo wareejiyaa fasallada waxbarashada caadiga ah. Ardayga waxaa la geeyaa fasalka ay arday da'diisa ah dhigtaan. Ardayda waxaa lagu haggaa inay waxbarashadooda ka sii wataan iskuullada ku takhasusay waxbarashada ardayda waddanka u soo guurey ama iskuulka u dhow meesha ay deggan yihiin.

Ardayga asalkiisu yahay dadka waddanka u soo guurey wuxuu afka Finnishka u bartaa luuqad labaad ahaan, wuxuuna u bartaa si waafaqsan qorshaha waxbarashada ee s2 (s2-opetussuunnitelman mukaisesti). Waxaa kaloo ardayga loo qabanqaabin karaa waxbarasho taageero ah oo lagaga caawinayo maadooyinka kala duduwan. Ardayda asalkoodu yahay dadka waddanka u soo guurey waxay kaloo xaq u leeyihiin adeegyada daryeelka ardayda iyo taageerooyinka ee caadi ahaan iskuulka uga jira.

Iyadoo hadba siday suuragal u tahay la eegayo ayaa ardayga waxaa kaloo loo qabanqaabin karaa waxbarashada afkiisa hooyo. Koox afka hooyo lagu barto waxaa la aasaasi karaa, haddii afar arday oo isku luuqad ah la helo. Waxbarashada afka hooyo waxaa la dhigaa todobaadkiiba laba xiisadood. Waxaa dhici karta in meesha waxbarashada afka hooyo lagu dhiganayaa noqoto meel kale oo aan ahayn ardayga iskuulkiisa.

Ardaygu wuxuu waxbarashada diintiisa xaq u helaa, hadday degmada deggan yihiin saddex arday oo isku diin ah. Waxbarashada diinta waxaa lagu dhigaa ardayga iskuulkiisa ama iskuul kale ama waxaa lagu dhigaa meel ay bulshada diintaas haysataa dadka diinta ku baraan. Waalidku markay ilmahooda iskuulka ka soo diwaangelinayaan bay soo sheegayaan diinta uu ilmohoodu haysto.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa iskudubbaridaha waxbarashada dadka waddanka u soo guurey tel. 044 703 9689